

PPS TAG Macluumaad ka Waalidka

Deyrta 2021



Mawduucyada Wakhtiga Aan Wada Joogno

*Bayaanka Hiigsiga Portland Public Schools ee Loogu Talagalay Ardaydeena Kartida iyo Hibada Leh

*Sharciga TAG

*TAG Ayaa La Qeexay

*Hanaanka magacaabista iyo aqoonsiga

* Qaabdhismeedka Degmooyinka ee Adeegyada

* Isku-xirka Waalidka-Macallinka

*Xeeladdaha Waxbarida ee dhammaan ardayda

*Qorshayaasha Dhismaha

*Codsiyada qorshaha shakhsiyeed ee TAG

Bayaanka Hiigsiga ee 2021-2022

Waxa nagu dhiirrigalisay siyaasadda sinnaanta PPS iyo tallooyinka bulshada, waxaan u maalgeshanaynaa horumarinta dadaalkeena si ka badan sidii hore ee ah inaan abuurno barnaamij si loo daboolo baahiyaha gaarka ah ee kala duwan ee dhammaan ardayda. Wuxaan la kaashan doonaa dhammaan dugsiyada xaafadaha si aan u taageerno barnaamijyada aan si wanaagsan wax uga qaban karno dhammaan baahiyaha ardayda TAG, u horumarinno una kobcino ardayda soo bandhiga kartida muujinta heerarka sare ee fekerka muhiimka ah oo aan u sameyno waddo loo maro iskaashi wanaagsan oo lala yeesho qoysaska. Ardayda TAG waxay dhisi doonaan bulsho ka kooban bartayaal iskaashi leh kuwaas oo leh xirfadaha lagama maarmaanka u ah inay si togan u saameeyaan adduunka ku xeeran.

Sharciga TAG: Waa maxay Ammarka TAG?

Ammarka: Sharciga Oregon ee Dib-u-eegista Lagu Sameeyay ee Waxbarashada Kuwa Kartida iyo Hibada Leh: 343.407, 409: Aqoonsiga ardayda kartida iyo hibada leh.

"Dugsiyada degmadu waa inay aqoonsadaan ardayda kartida iyo hibada leh ee ka diiwaangashan dugsiyada dadweynaha iyada oo la raacayo sharciyada ay ansaxiyeen Guddiga Waxbarashada Gobolku."

"Degmo dugsiyeedyadyadu waa inay siiyaan **barnaamijyo waxbarasho** ama **adeegyo** ardayda kartida iyo hibada leh ee ka diiwaangashan dugsiyada dadweynaha iyadoo la raacayo sharciyada ay ansaxiyeen Guddiga Waxbarashada Gobolku."

Ardayda Kartida iyo Hibada Leh waxaa lagu qeexaa sida:

koox arday ah oo muujiyay awood aad u wanaagsan inay u leeyihii qeyb gaar ah. Sida ku cad xeerka Federaalka, ardaydani waxay heleen inta u dhaxeysa boqolleyda 97-aad iyo 99-aad taas oo macnaheedu yahay inay keeneen heerka ugu sareeya marka la barbardhigo kuwa kale.

Ardayda Kartida iyo Hibada Lahaan kara waxa lagu qeexaa sida:

koox arday ah oo muujiya karti horumarsan ama xataa horumar aad u wanaagsan u leh aag gaar ah, oo hela dhibacaha u dhaxeeuya boqolleyda 95aad iyo 96aad. Iyada oo la adeegsanayo aalad qiimeyn iyo habraaac, PPS ayaa laga yaabaa inay aqoonsato ardayda leh awood ay ku fulin karaan heerar sare ha ahaato karti ama hibo.

Agaagga Magacaabist a iyo Aqoonsiga

Ilmahaagu waxa loo aqoonsan karaa inuu
3 meelood TAG u leeyahay

- Kartida Garaadka
- Xisaabta
- Akhriska

Haddii ilmahaaga aan hadda loo aqoonsan mid ka mid ah aagagga oo aad dareento inay u baahan yihiin in la qiimeeyo si loo go'aamiyo u qalmitaanka, waxaad u magacaabi kartaa ilmahaaga qiimeyn.

Habraaca Aqoonsiga TAG

Marka waalidka **iyo** macallinku ka wada hadlaan magacaabista TAG, waxa bilowda aqoonsiga TAG.

1. Macallinka fasalka **ama** waalidka ayaa ogeysiya Fudeydiyaha TAG ee goobta in ay magacaabayaan arday.
2. Fudeydiyaha TAG ee dhismaha ayaa Foomka Google iimeylka ugu diraya waalidiinta **ama** waalidiintu waxay gelii karaan Foomka Google ee lagu dhajiyay bogga internetka ee dugsiga. (*Dugsi kastaa wuxuu leeyahay foom gaar ah oo la xiriira dugsigiisa, haddii Aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan la xiriir macallinka ilmahaaga ama Fudeydiyaha TAG ee Goobta*).
3. Kadib marka waalidiintu soo gudbiyaan Foomkooda Google, oo ay oggolaadaan magacaabista, Fudeydiyaha TAG ee goobtu wuxuu macallinka u diri doonaa Foom Google si uu u buuxiyo.
4. Fudeydiyaha TAG wuxuu dhammeystira dhammaan macluumaadka kale ee loo baahan yahay.
5. Dhammaan magacaabista Foomka Google waa in loo gudbiyaa Fudeydiyaha TAG ee goobta marka la gaaro Diseembar 3, 2021.
6. TAG Proctor ama TOSA ayaa la shaqeyn doona Fudeydiyaha TAG ee dhismaha si loo dejijo taariikhda qiimeynata. Markay habboon tahay, xogta hadda jirta ee MAP ama OSAS ayaa loo isticmaali doonaa aqoonsiga xisaabta iyo akhriska.
7. Kooxda TAG ee Dugsiga (*macallin, maamule iyo Fudeydiyaha TAG*) ayaa dib u fiiriya xogta waxayna gaaraan go'aanka aqoonsiga ee ugu dambeeya.
8. TAG waxay u dirtaa waraaqo si ay u ogeysiiso qoysaska u qalmitaanka TAG.



Adeegyada TAG waxa bixiya
Macallinka Fasalka ee PPS

Macallimiinta waxa looga baahan yahay inay buuxiyaan Xawaaraha & Heerka Barashada ardayda TAG:

- **Xawaaraha** waxbarashadu waa cabbiraada socodka uu ardaygu si guul leh ugu gudbo manhajkiisa kadib marka lagu meeleeyo heerka ku habboon
- **Heerka** waxbarashadu waa heerka waxbarashada ardayga ee manhajka: waa meesha ardaygu ku guuleysan doono, laakiin wuxuu la kulmi doonaa aqoon iyo xirfado uusan weli baran ama xifdinin

Kulanka Waalidka/Macallinka


Qoysaska waxa lagu dhiirigelinaya inay qorsheeyaan kulan ay la yeeshaan macallinka ilmahooda si ay ugala hadlaan:

- Yuu ilmuuhu yahay arday ahaan?
- Maxay xiiseeyaan?
- Iyo, sidee bay sida ugu waxtarka badan wax ugu bartaan?

Qoysaska aaya ugu aqoon roon ilmahooda!

- La wadaag macallinka hadda wixii hore waxtar u lahaa iyo wixii carqalado ah ee uu hore u soo maray ardaygu.
- Weydii sida qoysasku uga taageeri karaan ardayga waxbarashadiisa guriga.

Ha sugin illaa Kulamada Waalidka-
Macallinka ee Noofembar!



Xeeladaha Wax Looga Qabanayo Xawaaraha

Ardayga iyo Heerka Waxbarashadiisa Wuxa

Kamid Noqon Kara:

- 1. Kooxeynta Dabacsan**
- 2. Casharro Heerar Leh**
- 3. Dardargelinta Manhajka**
- 4. Isku-rarid**
- 5. Daraasad/Mashruuc Madaxbannaan**
- 6. Weydiin Heer Sare ah**

Dedejintu maaha xalka

Hoos u dhaadhicid, falanqeyn dheeri ah, sharaxida sababta ama sida, difaacida sababeynta iyo gunaanadka, Ku dabaqida dhabta ah ee dunida ee xaaladaha cusub.

Ardayda TAG waa inay wakhti fiican ku qaataan qoto-dheerida Aqoonta (DOK) Heerarka 3 iyo 4.

DOK Heerka 3 layliyada/weydiintu waxay uga baahan yihii ardayda inay:

- Adeegsadaan feker xeeladaysan - baadhaan, soo gunaanadaan, mala-awaalaan, dib-u-eegaan oo dhaliilaan (kuwani waa tusaalooyinka qaarkood uun)

DOK Heerka 4 layliyada/weydiintu waxay uga baahan yihii ardayda inay:

- Isticmaalaan fikir balaadhan- nashqadeyaan, caddeeyaan, soo saaraan, isku xiraan oo ku dabaqaan fikradaha (kuwani waa tusaalooyinka qaarkood uun)

Dardargelinta Maaddo Kaliya

- Codsiyada SSA waxa la heli doonaa Sebteembar 7, 2021
- Ardayda dhigata fasalada 2aad-5aad iyo 7aad ee aasaaska guud way u qalmaan
- Go'aannada meelaynta ee codsiyada deyrta waxa la soo saari doonaa Oktoobar 11keeda, codsiyada gu'gana waxa la soo saari dona maalinta ugu dambeysa dugsiga.
- Ardayda u qalma ayaa lagu meeleyn doonaa koorsada xisaabta ee xigta ee tubta xisaabta (tusaale. 2aad ilaa 3aad, 6aad ilaa 7aad aasaaska guud)
- Dugsiyadu waxay isticmaali doonaan xogta Qiimeyn ta MAP ee lagu adeegsaday Deeyrta iyo Gu'ga si loo go'aamiyo ardayda u qalanta SSA. Bisaylka ardayga, rabitaanka shaqada koorsada ee la dardargeliyey, taageerada qoyska iyo tallooyinka macallinka ayaa sidoo kale la tixgelin doonaa.

Dhisida Qorshayaasha TAG

Dugsi kastaa wuxuu leeyahay qorshaha TAG ee goobta. Waxay ku ooli doonaan bogga internetka ee dugsiga waxaana lagu shubi doonaa bogga internetka ee TAG ee degmada kahor dhammaadka Oktoobar.

Goorma Ayaan Dalban Karaa Qorshe Shakhsiyeedka TAG?

- Haddii....kadib kulanka waalidka/macallinka, aad qabto su'aalo ku saabsan xawaaraha iyo/ama heerka barida/laylisyada.
- Haddii....aad u baahan tahay in si ballaaran laguugu cadeeyo adeegyada TAG ee lagu bixiyo dugsiga ama uu bixiyo macallin gaar ah.

Isgaarsiinta Ku Saabsan Wararka TAG

- 1. Wada-hadal joogto ah oo lala yeesho macalimiinta,
Fudeydiyaasha TAG ee goobta, iyo Maamulaha**
- 2. Samuurada TAG ee dugsi kasta**
- 3. Warsidayaasha/boggaga internetka ee macallimiinta
fasalka iyo dugsiga**
- 4. Qeybinta liisaska iimeylka ee Qoyska TAG**
- 5. PPS.NET/TAG**

Yaan La Xiriiraya Haddii Aan Ka Welwelsanahay Baahiyaha Ilmahayga?

- 1. La tasho macallinka ilmahaaga.**
- 2. La tasho Fudeydiyaha TAG ee dugsigaaga haddii aad dareento in su'aalahaagu uusan ka jawaabin macallinku.**
- 3. Qorshee kulan aad la yeelato maamulaha dugsiga.**
- 4. Kala tasho xafiiska TAG wixii taageero dheeraad ah - iimeyl ugu dir pps.net/tag**
- 5. Eeg bogga internetka ee Waaxda TAG www.pps.net/tag si aad u hesho ilo.**

Illaha Ardayda Kartida iyo Hibada Leh

- Ururka Qaranka ee Carruurta Hibada Leh - Taageerida ardayda TAG inta lagu jiro COVID-19 nagc.org
- Bogga Waxbarashada Dadka Hibada Leh ee Hoagies, bogga "All Things Gifted"
- Davidson Institute - Urur qaran oo aan macaash doon ahayn oo u heellan taageerida ardayda hibada ee da'doodu tahay 18 iyo wixii ka yar.
- John Hopkins: Xarunta Dhalinyarada Kartida leh
- Kuwa Kartida iyo Hibada Leh ee Oregon - oatag.org

Taageerada TAG ee Degmada

- **Matt Eide,**
Agaasimaha Waxbarshada K-12 ee Ardayda Kartida Hibada Leh
- **TAG TOSAs**
 - **Melissa Dunn**- Grant, Jefferson, iyo Lincoln clusters, Cleveland HS, Alliance, Benson and PISA
 - **TBD** – Franklin iyo McDaniel clusters
 - **Kim Bertelsen** – Cleveland, Roosevelt, and Wells clusters, iyo Pioneer Programs
- **Karraaniga Xogta TAG**
 - **Lisa Draper**